



Dabka Eagle Creek: Ardayda Cleveland waxay bixiyaan awooda wax raadin iyo samata-bixineed

Baaxada inta badan dadka reer Portland ay ka dareemeen dabkii Eagle Creek ee Columbia Gorge wuxuu ahaa ka dhaqida dambaska ee baabuurtooda, iska ilaalinta jimicsiga bannaanka, iyo murugada luminta meelihii ay jeclaayeen ee ay duurka ku lugayn jireen 'hiking'. Laakiin koox ka kooban ardayda Dugsiga Sare ee Cleveland oo tabaruc ahaan ugu shaqeeya kooxda Wax raadinta iyo Samata-bixinta ee Degaanka Multnomah, dabkii Eagle Creek wuxuu ahaan doonaa waayo-aragnimo aan la ilaawi karin.

Ardaydan waxaa loo waca marka dadka duurka ku lugeeyaa 'hikers' ay ku lumaan kaynta ama marka qof la waayo ee uu ku dhex lumo duurka. Markii dab 42,000-hektar ahi uu bilaabay in uu khatar geliyo guryaha ku dhow Gorge, waxay ahaayeen kuwii loogu wacay in ay caawiyaad ka geystaan daadgureynta.

"Waxa ugu muhiimsan ee ay tahay in dadku naga fahmaan anagu waa in aynaan tani u samaynayn codsiyada kulliyadda awgeed." ayuu sheegay Tanguy Bader oo sanadkii u dambeeyay dhigta Cleveland. "Waxaan runtii aaminsanahay in aan wax caawino iyo ilaalinta dadka."

"Waxaadna had iyo jeer garan kartaa marka qofku halkaasi u joogaa iska dhigo qof wax qabanaya marka laga hadlayo codsiyadiisa kulliyadda," ayuu sheegay Bennett Gaeta oo sanadkii saddexaad ee dugsiga dhigta. "Waqti dheer ma joogaan inta lagu jiro tababarka."

Kooxdu way qososhay waxayna la dheceen kooxo sheekooyin ah oo ku saabsan sida ay u adag tahay in ay la dhammeysto barnaamijka tababarka ee soconaya sagaalka bilood.

Bader iyo Gaeta waxay ka mid yihiin koox ka kooban 10 ardayda 10 oo ka tirsan Cleveland oo toddobaad iyo bar ku qaatay taageero ka geysashada daadgureynta in ka badan 1,000 guri markii dabka ka kacay Columbia Gorge. Dagaalyahanada 10-ka ah waa qayb ka mid ah koox weyn oo mutadawiciin dhallinyaro ah oo la geeyo dhammaan gobolada mar kasta oo ay dhacdo xaaladaha degdeg ahi.

Laga soo bilaabo galabnimadii Sibtambar 3 ilaa Sibtambar 14, kooxda Wax raadinta iyo Samata-bixinta ayaa la geeyay bulshooyinkii halista degdega ah ku sugnaa, ama khatartu mustaqbalka ka soo gaari karaysay, dabka sida dhaqsaha ah u faafayay. Mas'uuliyadooda koowaad waxay ahayd in ay albaab-albaab u garaacaan iyaga oo dhex socda Dodson, Warrendale, Bridal Veil, Women's Forum, Larch Mountain iyo Corbett, dadkana la socodsiinaya in ay tahay in ay sameeyaan mid ka mid ah saddex arrimood, iyada oo ku ay ku xiran tahay hadba u dhawaanshaha dabka: "u diyaar garow" in lagu daadgureeyo adiga soo urursanaya alaabadaada, isla markaana samaysanaya qorshe meel aad ku magan gasho; "isku diyaari" in lagu daadgureeyo, sababtoo ah khatarta dabka oo soo fool lahayd; iyo, ugu dambeyn, "soco." Labadii heer ee horreeya ee daadgureyntu waa kuwo ikhtiyaari ah waxaana lagu talinayaa in sidaasi la yeelo. Heerka seddexaad waa mid waajib ah, iyada oo kooxda wax raadinta iyo samata-bixiyeyaasha, goobta la geyn doono iyaga oo laba-labo u socon doona, uuna wehelin doono sarkaal ka tirsan booliiska ama ku-xigeenka degaanka.

Kooxdu waxay is xasuusiyaan waayo-aragnimada iyaga oo dareemaya ixtiraam.

"Waxaa jiray dhowr guri oo heerka seddexaad ee digniinta daadguraynta ku jiray halkaasi oo sarkaalku ay noqotay in uu garaaco albaabka si uu u ogaado in xaaladu ay halis tahay," ayuu sheegay Will Heins, oo sanadkii u dambeeyay dhigta Cleveland. "Si daacadnimo leh haddii aan u hadlo, qaylada ay awoodeen in ay sameeyaan wax walba wuu toosin lahaa."

Hal dhacdo, mulkiilihii guriga ayaa diiday in uu albaabka furo, ayuu sheegay Gaeta. "Sarkaalkii ayaa kala hadlay isaga oo adeegsanaya daaqada/dariishada hore ee guriga, iskuna dayayay in uu u sharaxo in noloshiisu khatar ku jirto haddii uu sii joogo." Ardayda ayaa loo digay oo loo sheegay in ay dib u joogaan si ammaankooda loo ilaaliyo, waxayna ugu dambeyntii ku khasbanaadeed in ay ay gudbaan guriga xiga iyaga oo aan ninkii ka caawinin in uu ka tago gurigiisa.

"Kuwa naga midka ah ee aan qaybta ka ahayn hawlgallada wax raadinta iyo samata-bixinta halkaasi oo aanu badbaadinay ama helnay qof, tani waxay ahayd saameyntii ugu weynayd ee aan awoodnay in aan la samayno tababaradayada," ayay sheegtay Camille Christensen, oo sanadkii saddexaad ee dugsiga dhigata. "Waxay ahayd mid daal badan, laakiin waa mid faa'iido leh."

Ardayda intooda badan, waqtigoodii Gorge waa mid wax kor saaran yahay, ha ahaato hurdo la'aan (waxay mararka qaar shaqeeyeen 36 saacadood, iyaga oo helay saacad ama laba saacadood oo hurdo ah) ama tirada dadka ee ay caawiyeen. Waxaa jirtay haweenay ka soo baxday xeradeedii iyada oo wadata barkin ay ka buuxaan digaag nool, aanan hubin sida loo daryeelo fardaheeda; waxaa jiray kooxo soorooyin (nuns), oo ka weynaa inta badan dadkii ay caawiyeen, kuwaas oo aad ugu hawlanaa daadgureynta; waxaa jiray qoyska ay si kadis ah ula kulmeen dhowr jeer hal maalin, oo loo sheegay in ay ka baxaan guryahooda hal magaalo ku yaalay oo hadana mar dambe loo sheegay in ka baxaan hoygii ay ka heleen magaalo halkaasi u dhow.

Adeega bulshadu waa hal shay. Isku soo dhawaanshuhu waa wax kale, ayuu arday sheegay.

“Waan iskaga dhownahay koox kasta oo cayaareed oo jirta ama naadi ay waligood gaari karaan,” ayuu dib u xasuustay Gaeta, isaga oo madaxa foorarinaya isla markaana ay kooxdu dhoola caddeynayso. “Waxaan ku tababaranaa sanadka oo dhan xaaladaha ugu daran, anaga oo duurka ku lugaynayna ‘hiking’ tobonaan mayl isla markaana hoy ka dhiganayna barafka iyo roobka, mararka qaarkoodna ay jirto dabayl uu heerkulkeedu ka hooseeyo soddomeeyo.”

“Kuwani waa saaxiibadayda iigu dhow,” ayay sheegtay Caroline Diamond, oo sanadkii u dambeeyay dhigata Cleveland. “Waxaanu nolosha badbaadinaa anaga oo wadajirna.”

Kooxda Wax raadinta iyo Samata-bixinta ee Degaanka Multnomah waxay mar kasta u baahan tahay deeq iyo mutadawiciin. Si aad lacag ugu deeqdo ama u ogaato waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan tabarucida, booqo website-kooda: www.mcsosar.org.